TILMAANTA BUKAANKA SAWIRKA BAARISTA KLIINIKADA MANKATO

# ULTRASOUNDKA DHALMADA TIRMESTERKA 2aad/3aad

2nd/3rd Trimester Obstetric Ultrasound - Somali

Bukaanka: ______________________________________________________________

Taariikhda Ballanka: _______________ Waqtiga Imaashada: ____________________ am/pm

Goobta: Waaxda Sawirka Baarista ee Kliinikada Mankato
1230 East Main Street, Mankato, MN 56001

**Maxuu yahay Ultrasoundka Dhalmada?**

Ultrasoundka dhalmada wuxuu adeegsadaa hirarka dhawaaqa, ma adeegsado shucaaca, iyo qalab lagu magacaabo "transducer" si loo helo sawirada cunugaada iyo xubnaha ku yaal gudaha qaskaada.

## Baarista Ka Hor:

- Ma jirto cunto kaa reeban xagga baaristaan.
- In aad soo daahdid waxay dhalin doontaa in ballan kale loo qabto baaristaada.

## Inta ay Socoto Baarista:

- Waxaa lagu weydiin doonaa in aad dharka iska dhigtid. Waxaa lagu siin doonaa goono.
- Waxaa lagaa codsan doonaa in aad ku seexatid sariir.
- Baaristaan waxay qaadan kartaa ilaa 60 daqiiqo si loo dhamaystiro xagga uur jiif kasta.
- Hal qof oo keliya ayaa loo ogol yahay in uu hooyada la fiirsado ultrasoundka halkii mar, Waxaa lagu tallinaa in aadan soo wadanin caruur ka yar 5 sanno, bacdamaa baarista qaadan karto 30 daqiiqo ama ka badan, caruurtana waa ku daalaan waxaana ka tagta dagganaashada.
- Burcad diiran ayaa lagaa saari doonaa qeybta calooshaada iyo qeybta simanka.
- Qalabka "transducer" ayaa la marmari doonaa calooshaada iyo qeybta simankaada inta ay socoto baarista.
- Waxaa kaloo loo baahan karaa in la adeegsado qalabka la geliyo siilka. Tan waxay u baahan tahay in qalabka ultrasoundka la geliyo siilkaada si loo arko gudaha sida ay u samaysan yahiin simanka. Qalabka dhawaaqa (sonographer) wuxuu kuu ogolaan doonaa in aad faaruqisid kaadi hayntaada ka hor inta aan la galin baarista gudaha siilka.
- Qalabka dhawaaqa (sonographer) wuxuu qaadi doonaa dhowr sawir.
- Sawiradaada waxaa fiirin doono, waxaan akhrin doono aqoonyaanka qalabka shucaaca.
- Warbixinta saxixan ee ugu dambeyso waxaa loo diri doonaa bixiyaha dalbay baarista.

## Baarista Kaddib:

- Waxaad ku noqon kartaa cuntadaada caadiga haddii aan lagu siinin tilmaamo kale.

**Waa la fiirin doonaa baaristaada, waxaana akhrin doono aqoonyaanka Raajada 24ta saac xigta gudaheeda. Waxaa warbixin loo diri doonaa bixiyehaada si uu u fiiriyo. Bixiyehaada wuxuu mas'uul ka yahay in uu kuu soo gudbiyo natiijadaha, waxaana laguu soo diri doonaa warqad, telefoon, ama waxaa lagu siin doonaa ballan si laguula socdo. Haddii aan lagu siinin ballanka laguula socdo, aadna waxba ka maqlin muddo hal todobaad gudaheeda, waxaad xaq u leedahay in aad wacdid waaxda bixiyehaada una weydiisid natiijada.**

**Haddii aadan awoodin in aad xajisid ballankaada ama aad su'aalo ka qabtid baaristaada, fadlan wac 507-389-8570.**

**Fadlan iska xaadiri Diiwaan Gelinta Dhexe (Central Registration) ka hor inta aadan tagin Waaxda Sawirka Baarista.**